

# Xuquuqda Waxbarashada Gaarka ah ee Waalidka iyo Ardayda

## Dhawritaanada Habraaceed

Khayraadkan waxaa loogu talo geley guudmarka kooban ee qaar kamid ah xuquuqda waxbarashada gaarka ah ee waalidka iyo ardayga. Fadlan ka eeg buuga [dhawritaanada habraaceed ee](#) buuxa wixii faahfaahin dheeraad ah.



### Wargelinta Dhawritaanada Habraaceed

Dugsiyada waa inuu bixiyaa sharax qoraal ah oo xuquuqdaada ah sida uu dhigayo Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Qaba Laxaad La'aanta (IDEA) iyo sharciga gobolku.



### Ka Qayb Galka Waalidka

Waxa aad xaq u leedahay inaad ka qayb gasho kulanka ku saabsan waxbarashada ardaygaaga, oo waxaa kamid ah kulamada Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP).



### Sirta

Dugsiyada waa inuu xaqiijiyaa ilaalinta xogta, macluumaadka, iyo diiwaanada sheegeysa haybta shakhsi ahaaneed ee uu uruuriyay ama uu hayo dugsiyada.



### Ogolaanshaha Laga Warqabo

Kahor qiimaynta ama bixinta adeegyada marka kowaad, dugsiyada waa inuu dalbadaa oo uu helaa ogolaanshahaaga. Ogolaanshuhu waxaa weeye ikhtiyaar, waa inay noqotaa qoraal, oo waxaa laga noqon karaa wakhti kasta.



### Wargelinta Qoraalka ah ee Hore

Dugsiyada waa inuu bixiyaa wargelinta qoraal ah kahor inta aan la bilaabin ama bedelin meelaynta ardaygaaga, aqoonsiga, qiimaynta ama bixinta waxbarashada shacabka munaasabka ah ee bilaashka ah (FAPE).



### Qiimaynta Waxbarashada ee Madaxa Banaan

Hadii aanad ku qancin natiijada qiimaynta dugsiyada, waxa aad xaq u leedahay inaad dalbato qiimaynta waxbarashada oo madax bannaan oo ardaygaaga ah ee uu sameeyo qof aan ahayn shaqaalaha dugsiyada.



### Helitaanka Duwaanada Waxbarashada

Waxa aad xaq u leedahay inaad aragto oo aad hesho sharaxa duwaanada waxbarashada ardaygaaga.



### Ikhtiyaarada Xalinta Muranka

IDEA waxay ku siisaa ikhtiyaarka inaad si rasmi ah uga doodo dugsiyada hadii aanad ku qancin waxa munaasabka ah, oo waxaa kamid ah: dhexdhexaadin, cabashada gobolka, ama dalabka dhagaysiga cabashada nidaanka.